

Lynnwood Link Connections

Wajiga 1 ee Guudmarka Wada Shaqaynta Shacabka

Febraayo-Juun 2022



Wajiga 1 ee Wadashaqaynta - Qiimaynta Baahiyaha

La Qabtay Febraayo-Juun 2022

Yoolasha

Ujeedada Wajiga 1 ee la shaqaynta waxay ahayd in la fahmo baahiyaha gaadiidka ee aaga mashruuca iyo shaqaalaysiinta xubnaha si ay uga shaqeeyaan Gudiga Dhaqdhaqaaqa bulshada. Inta lagu jiray wajiga kowaad ee wada shaqaynta bulshada, Metro waxay diirada saartay in mashruuca la baro xubnaha bulshada, isku keenista macluumaadka iyadoo loo maraayo xog uruurinta qiimaynta baahiyaha ee luuqadaha badan, abuurida xidhiidhka ee hay'adaha bulshada ee waqooyigalbeed Degmada King, iyo shaqaalaysiinta iyo isu keenida Gudiga Dhaqdhaqaaqa iyo Gudiga Qiimaynta Iskaashiga. Baaxada mashruuca waxaa loo soo bandhigay dadka danta ka leh ee gudaha iyo banaanka.

Kooxda mashruuca waxay ogaadeen xaaladaha, mushkiladaha iyo baahiyaha jira iyada oo lagu sameeyay qiimeyn, dib u eegista sinnaanta,, isku duwida deegaanka ee maamullada magaalooyinka iyo hay'adaha, iyo la shaqaynta bulshada. Metro waxay la yeelatay kulamo taxane ah Gudiga Dhaqdhaqaaqu oo ay ku eegayaan ra'yi celinta dadweynaha aan ka helnay. . Macluumaadkaas waxay ka caawiyeen ogaanshaha baahiyaha mudnaanta leh ee dhaqdhaqaaqa taasoo ka hagtay kooxda qorshaynta Metro curinta nuxurka adeega qabyo qoraalka ah. Nuxurka adeegaas qabyo qoraalka ah waxaa lala wadaagay Gudiga Dhaqdhaqaaqa iyo Gudida Qiimaynta Iskaashiga Juun 2022 si ay dib ugu eegaan oo ay fikir kooda uga dhiibtaan su'aalaha muhiimka ah ee qorshayaasha la shaqaynta bulshada Wajiga 2.

Waxa aanu ka ogaanay La Shaqaynta Wajiga 1

Metro waxay soo koobtay ra'yi celinta ay heshey iyada oo adeegsanaysa qaabab kala duwan oo wada shaqayn ah, waxayna aqoonsatay 10 ka baahiyood ee soo socda ee aagaga mashruuca oo ku salaysan macluumaadka shacabka laga heley.

Barnaamijyada Qiimaynta Baahiyaha Wajiga 1

1. **Abuurida iyo horumarinta xidhiidh cusub oo gaadiidka bari-galbeed ah**
2. **Bixinta gaadiid aada/ka yimaada meelaha waawayn ee muhiimka ah ee bulshadu ay tilmaamtay, , halka ay bulshada mudnaanta leh* ay degan tahay, iyo meelaha ay qorshaysan tahay in laga dhiso guryaha badan (ugu danbayn2026)**
3. **Kordhinta amaanka iyo raaxada boostaajooyinka inta lala socdo baska ama tarenka**
4. **Xaqiijinta helitaanka munaasabka ah ee boostaajooyinka lagu imanayo/lagaga tagayo gaadiidka shacabka**
5. **Xaqiijinta in u kala wareega gaadiidku ay haboon yihiin, la heli karo, lagu kalsoon yahay oo ay is waafaqsan yihiin ilaa inta macquulka ah ee dhamaan rakaanka, gaar ahaan bulshada mudnaanta leh.**
6. **Sugida iyo hormarinta jidadka lagu badan yahay ee ku xidhan meelaha waawayn marka la tagayo/laga soo socdo iyo/ama gaadiidka dadku ku badan yihiin ee muga weyn (sida, RapidRide, Link, Stride BRT)**
7. **Hormarinta adeega gaadiidka habeenkii iyo fiidkii ee u adeega meelaha waawayn/muhiimka ah**
8. **Hormarinta wakhtiga socdaalka gaadiidka ee lagu imanayo/lagaga tagayo meelaha waawayn**
9. **Hormarinta adeega gaadiidka maalmaha fasaxa todobaadkii ee meelaha waawayn/muhiimka ah**

10. Hormarinta isku xidhka waqooyi-koonfur ee gaadiidka lagu imanayo/lagaga tagayo marinnada iyo xarumaha

**Bushooyinka Mudnaanta leh: bulshooyinka mudnaanta leh waxaa kamid ah xubnaha bulshada ee ay dhici karto dakhligooda qoysku inuu yahay \$35,000 ama ka yar, qaba naafannimo , guriga kaga hadlo luuqad kale oo kaliya oo aan ahayn Ingiriisi , ama isu aqoonsado qoomiyad iyo/ama isir aan ahayn Cadaanka Hisbaanig ahayn.*

Mustaqbalka

Wajiga 2, wacyi gelinta shacabka iyo mid diirada la saaray ayaa loo qaban doonaa aagag ama kooxo gaar ah kuwaas oo ay saamayn karaan isbedellada ugu badan. Waxaa kamid noqon kara aagaga deegaanada ee adeega laga yaabo in laga wareejiyo ama laga joojiyo; dugsiyada iyo aagaga kale ee waxbarasho; gaadhitaanka meelaha bulshada ee muhiimka ah; iyo sidoo kale aagaga mudnaanta sinnaanta ee isbadalada lagu taliyay ay keeni karaan isticmaalka marinno ka duwan kuwa hada jira.

Wacyi gelinta shacabka ee guud waxa ay siin doontaa fursado rakaanka caadiga ah iyo dadka deegaanka inay eegaan macluumaadka wadooyinka oo ay ra'yigooda ka dhiibtaan sida isbadalani ay u hormarin karaan ama u yarayn karaan awoodooda isticmaalka gaadiidka shacabka.

Hadii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo luuqadaada ah, faldan booqo boga mashruuceena Lynnwood Link Connections ([Lynnwood Link Connections - King County Metro Transit](#)) ama nagala soo xidhiidh: haveasay@kingcounty.gov